




Aamin iyo habar dugaag





Aamin iyo habar dugaag

Buugga 14^{aad} | Fasalka 2^{aad}




Buuggan waxaa maalgaliyay hay'ada USAID Waxaana isla diyaariyay PACT ETHIOPIA iyo xafiiska waxabarashada DDSI. Waxaana dib u habayn iyo daabacaad ku sameeyay hay'ada Save the children iyo wasaarada wax barashada heer federal

2008 T.I.




The CC By license lets others distribute, adjust, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.

For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>




Maalin maalmaha ka mid ah ayuu Waraabe habar dugaag isugu yeedhay. oo wuxuu ku yidhi waxaan idinka rabaa in magacii hore la iga badalo, waxaana idinka doonayaa in aad iibixisaan aamin.



waxaa loogu jawaabay
oo lagu yidhi war
magacaagii hore maad
iska daysatid, waraabihii




wuu soo istaagay wuuna
ku adkaystay codsigiisii,
oo waxuu yidhi waan
isbadalaye aamin ha la
iibixiyo. Waayahay ayaa
lagu yidhi.




Kadibna waxar yar ayaa
la soo qabtay oo loogu
magac bixinayo magacii
cusbaa ee waraabe
Waxartii ayay habar
dugaagtii kale geed




meeshan ah sudheen,
waraabihii ayaa lagu
yidhi sii eeg ilaa inta
bari la isu imaanayo si
magacaaga cusub goob
joog loogu wada noqdo.




Xoogaa hadii laga sii
maqnaa baa waraabihii
ayaa is yidhi horta
dhiiga maad ka sii leeftid
koleey wuu daadanayaaye.





ayuu hadana is yidhi
garbaha iska cun wax ba
ma ahee. markaasuu illaa
jeenyihii cunay Kadib suu
kolba iin yar u cunayay
ayuu dhameeyay waxartii
oo dhan



Aroortii hore ayaay
habar dugaagtii kale isu
yimadeen Kolkaasaa lagu
yidhi waxartii laguugu
magacbixiyey meeday.
Markaasuu wuxuu ugu
jawaabay habar dugaagay
magacaygu waa kii hore

